

# IDRS Infectious Disease Reporting System

Disease Reporting 24 Hours a Day

Columbus Public Health and Franklin County Public Health

## CRYPTOSPORIDIOSIS

Cryptosporidiosis waa cudurka shubanka, waxaa keena barasiit badanaa ku nool biyaha. Barasiitka wuxuu qaadan karaa qaab adag oo lagu magacaabo "cyst," taasoo adkeysa in la dillo.

### Calaamadaha

Badanaa calaamadaha waxay soo baxaan 1-12 maalin gudahooda kaddib marka barasiitka soo gaaro qofka, waxaana ka mid ah:

- Shuban biyo-biyo ah (wuxuu ahaan karaa mid dhexdhexaad ah ilaa mid darran)
- Majuujinta caloosha
- Marmar dadka waxaa ku dhaca qandho yar, labbolabbo, mattag, cunto xumo, iyo madax xanuun.
- Dadka caafimaadka qaba, badanaa cryptosporidiosis wuxuu gaaraa hal ilaa labo todobaad.

### Gudbinta

- Caadi ahaan, barasiitkaan waxay ku nool yahiin balliyada iyo durdurrada. Kloriga ma dillo "cyst," sidaas darteed waxay ku noolaan karaan balliyada lagu dabaasho, qabeyska kulul, ama biyaha ceelka. Badanaa dadka waxay xanuunsadaan marka ay liqaan biyaha inta ay ku sugan yahiin dabaasha.
- Cryptosporidium wuxuu kaloo ku faafi karaa qof ilaa qof marka gacmaha, meelaha fidsan, ama shay soo gaaro wasakhda saxarada (xaarka) qof qaba cudurka. Goor dambe, waxaa dhici karto in dad kale taabtaan waxyaabahaan kaddibna si aan la ogeyn "cyst" u gudbiyaan afkooda ama raashinka.
- Waxaa dhici karto in dadka ku xanuunsadaan cunidda raashinka uu diyaariyo qof qaba xanuunka cryptosporidiosis.
- Xoolaha waa qaadi karaan xanuunka cryptosporidium kaddibna waxay u gudbin karaan dadka ka shaqeeya ama nadiifiya xoolaha meesha ay ku sugan yahiin ama marka diggada xoolaha wasakheyaan biyaha ama saadka raashinka.

### Daweynta

- Bixiyaha daryeelka caafimaadka wuxuu cryptosporidium ka baari karaa cad laga soo qaaday saxarada.
- Inta badan dadka, iskooda ayay uga bogsadaan cryptosporidiosis. Bacdamaa shubanka sabab u noqon karo biyo baxa, dadka xanuunsan waa in ay cabaan dareere badan ilaa ay ka soo raystaan.
- Bixiyaha daryeelka caafimaadka wuxuu dadka u baahan u qori karaa daawada lagu magacaabo Alinia. Dadka dhibaataada ku qaba siistemka difaaca waxay dhibaato kala kulmi karaan in ay iska fogeyaan cudurka.

### Ka Hortagga

- Si wanaagsan u dhaq gacmaha, khaas ahaan kaddib marka aad tagtid musqusha ama marka aad baddashid xafaayadda, ka hor inta aadan diyaarinin cuntada ama cunidda. Ku dhaq biyo kulul iyo saabuun. Nadiifiyaha gacanta ma dillo nabaraha cryptosporidium.
- Ka dil jeermiga meelaha fidsan ee laga yaabo in uu soo gaaro jeermiga la socda gacmaha ama saxarada, khaas ahaan musqusha, jikada, meelaha lagu baddalo xafaayadda, iyo alaabta ilmaha ku cayaarto iyo sariiraha ilamaha.
- Ha cabbin waxyaabaha aan laga dillin jeermiga sida caanaha, waxyaabaha laga sameeyo caanaha, juuska, ama juuska tufaaxa
- Ha tagin dabaal marka aad qabtid shuban. Waxaad jeermiga ku faafin kartaa biyaha, taasoo cudurka u gudbisa dadka kale. Haddii aad caruurta geysid dabaal, waxaad geysaa musqusha dhowr jeer ama fiiri xafaayadooda in badan. Qof kasta waa in uu ku qabeysto tubada iyo waa in uu si wanaagsan isu dhaqo ka hor inta uusan gelin balliga ama biyaha kulul.

### Macluumaad Dheeraad ah

Dadka qaba cryptosporidiosis ee taga xarunta daryeelka cunugga ama ka shaqeeya adeegga raashinka, daryeelka bukaanka, ama xanaanada cunugga, waa in ay joogaan guriga ilaa shubanka ka dhamaado. Sharciga Ohio wuxuu leeyahay shaqaalaha adeegga raashinka ee qaba cryptosporidiosis waa in laga qaado saddax cad oo saxaro ah oo aan lahayn barasiit ka hor inta aysan ku soo noqonin shaqada.

Dhamaan macluumaadka waa guud mana loogu talogalin in loo isticmaalo in lagu baddalo waanada qofka aqoonta leh.



c/o Franklin County Public Health, 280 East Broad Street, Columbus, Ohio 43215-4562

Call: (614) 525-8888 • After Hours: (614) 525-3965 • Fax: (614) 525-8890

Email: [idsr@franklincountyohio.gov](mailto:idsr@franklincountyohio.gov) • Web: [www.idrsinfo.org](http://www.idrsinfo.org)

